

# Orientation to Ontario

## GAADIIDKA

### GAARI WADISTA

Waxaad adeegsan kartaa ruqsada aad kala timid wadankaagii hooyo muddo 60 maalmood ee ugu horeeya ee aad joogto Ontario.

Si aad u hesho ruqsada darawalka ee Ontario, waxaad u baahan doontaa inaad keento dukumiintigaaga aqoonsiga. Waa inaad sidoo kale keentaa ruqsadaada darawalka iyo cadaynta khibrada darawalnimada ee wadankaagii hooyo.

Waxaad mari kartaa baaritaanka araga iyo inaad ku baasto imtaxaanka aqoonta.

- Si aad xog badan uga ogaato qaadashada ruqsada darawalnimada ee Ontario, booqo [drivetest.ca](http://drivetest.ca) ama [findlink.at/driverinfo](http://findlink.at/driverinfo)
- Si aad u hesho dukumiintiyada aad u baahan tahay, booqo [drivetest.ca](http://drivetest.ca) ama [findlink.at/licensing](http://findlink.at/licensing)

Ka baro xeerarka wadada ee Ontario barta [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/dhandbook](http://findlink.at/dhandbook)

### CAYMISKA

Mulkiilaha gaari kasta waa inuu leeyahay caymis. Ontario waxay leedahay qorshaha caymiska ee khalad la'aanta. Haddii aad dhaawacanto ama gaarigaaga waxyeelo kasoo gaarto shil, waxaad sheegashada u gudbinaysaa shirkadaada caymiska, maaha shirkada darawalka kale.

- Xog ka ogoow caymiska aadan khaladka lahayn adoo booqanaaya Laanta Caymiska ee Canada: [ibc.ca](http://ibc.ca) ama [findlink.at/nofault](http://findlink.at/nofault)

Ka fiiri dalaaliinta iyo shirkadaha caymiska Yellow Pages ee [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)

### GAADIIDKA DADWAYNAHA

Deegaanno badan oo ku yaala Ontario ayaa leh nidaamka gaadiidka dadwaynaha. Waxaad iibsana kartaa tigidhada keliga ah laakiin waxaa badanaa qiimo jaban oo fudud inaad iibsato kaararka ama tigidhada bilaha ah oo jumlo ah. Nidaamyada qaar ayaa leh qiime gaar u ah ardayda iyo waayeeelka.

S aad xog ug ogaato gaadiidka dadwaynaha ee aagaaga, akhri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefannada ama booqo Wasaarada Gaadiidka oo aad ka helayso [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/transit](http://findlink.at/transit)




**Tagaasida iyo gaariyaasha raaxada** - Waxaad wici kartaa nidaamka tagaasida ama waxaad adeegsan kartaa aabka taleefankaaga si aad tagsi u codsato. Magaalooyinka qaarkod, waxaad tagsi ka qabsan kartaa wadada. Inta badan tagaasida ayaa cabir ku saheeya waana inaad si qeexan ugu jeedaa cabirka. Waxaad darawalka waydiin kartaa qiyaasta qarashka kahor intaadan gaariga fuulin.

Ka fiiri adeegga tagsiga ee maxaliga ah Yellow Pages ama booqo [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)

**Gaariga ama Taraaga la Kireysto** - Waxaad kireysan kartaa gaariyaasha iyo taraagyada yaryar muddo maalin ah, asbuuc ah ama muddo ka badan adoo ka kireysanaaya shirkadaha kirada ee gaarka loo leeyahay. Si taxadar leh u akhri heshiiska. Ka fiiri shirkad kiro Yellow Pages ama booqo [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)

**Gaari wadaag ah** - Magaalooyinka waawayn, waxaad ku biiri kartaa adeegga basaska oo

Funded by / Financé par



kuu sahlaaya inaad kiraysato gaari muddo koobanaadna lacagta ku bixiso qiimo sacadiiba go'aan. Adeegyadaan ayaa leh goobaha qaadista iyo dejinta oo aad ku qanci karto. Ka fiiri shirkadaha gaariyaasha la wadaago ee Yellow Pages ama booqo [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)

### BAASKIIL WADISTA

Deegaannada qaarkood ayaa marinada baaskiilka u sameeyay dadka wata, qaar badana iyo wadiiqooyinka baaskiilka ee goobaha nasiinada. Marka aad baaskiil wadato, waa qasab inaad ku dhaqanto dhammaan sharciyada wadooyinka. Dadka baaskiilka wada ee kayar 18 sano waa inay xidhaan koofiyada amaanka.

Si aad xog badan uga ogaato baaskiil wadista iyo badqabka, wac Service Ontario [1-800-267-8097](tel:1-800-267-8097) ama booqo bogga Wasaarada Gaadiidka oo aad ka helayso [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/Cycling](http://findlink.at/Cycling)

### OGEYSIIS MUHIIM AH

- Sido ruqsadaada darawalnimada si laguugu aqoonsado.
- Markasta ku hayso gaariga caymiskaaga iyo dukumiintiga mulkiyada.
- Marna ha cabin khamri adoo gaari wadaaya.
- Cidna ha wicin ama fariin qoraal ha u dirin adoo gaari wada.
- Markasta xiro suunka amaanka.
- Ruqsad gaar ah ayaa loogu baahan yahay taraagyada iyo baaskiilada.

